Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiir Ku-Xigeenka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب نائب وزير

Somali Federal Republic
The Ministry of Finance
Office of the Deputy Minister

**Ref: MOF/ODM/134/023** **Date: 12 Oct, 2023**

# Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaran

Wasiir Ku-xigeenka Maaliyadda, ahna Ku-simaha Wasiirka Maaliyadda;

| | |
|---|---|
| **Isagoo fulinaaya** | Mid ka mid ah ujeedooyinka lagu sheegay Qodobka 1(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee la xiriira dabagalka dakhliga; |
| **Isagoo u hoggansamaya** | Mabda'a lagu sheegay Qodobka 2 (1) (r) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo wax-ku-ool ah; |
| **Isagoo gudanaya** | Awoodaha lagu siiyey Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Lr. 13 ee 27 October 2019) ee tilmaamaya inuu soo saarayo Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-galiyo Sharciyada Dakhliga; |
| **Markuu arkay:** | Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib u heshiisiinta ee ku aadan Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaran; |

**Wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan soo socda;**

## Qodobka 1aad
## Magaca iyo Ujeeddada

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa "Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaran".
2. Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan waa jaangoynta khidmadaha adeegyada Aqoonsiga Qaran oo ay bixiso Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka, si loo fududeeyo helitaanka adeegyada Hay'adda.

Ministry of Finance, Shangani District
Email: Deputy.minister@mof.gov.so,
Matanhange@gmail.com
Tell: +252610883275 / +254724287675(WhatsApp)

## Qodobka 2aad
## Jaangoynta Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaranka

1. Qof kasta oo ay Hay'addu u qabanayso adeegyada Aqoonsiga Qaranka, wuxuu bixinayaa khidmadda ku aadan adeegga loo qabanayo ee lagu jaangoyay Qodobkaan.

2. Khidmaddaha lagu sheegay jaantuska hoose ayaa noqon doona kuwo la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

| Lr. | Qaybaha Adeegyada Aqoonsiga Qaran | Khidmadaha |
|---|---|---|
| 1 | **Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka** | $5 |
| 2 | **Kaarka Aqoonsiga qof kasta oo Dalka si sharci ah ku degan** | $15 |
| 3 | **Cusboonaysiinta Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka** | $10 |
| 5 | **Cusboonaysiinta Kaarka Aqoonsiga qof kasta oo Dalka si sharci ah ku degan** | $15 |
| 5 | **Wax kabadlka xogta Kaarka Aqoonsiga ee hore loo bixiyay** | $10 |

## Qodobka 3aad

## Bixinta iyo Ururinta Khidmaddaha

1. Khidmadaha Adeegyada ay bixiso Hay'addu waxaa qaadi kara oo keliya saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ee oo la igmaday qabashada khidmadaha adeegyada ay bixiso Hay'adda si waafaqsan Hannaanka Shuruucda Maareynta Maaliyadda Guud.

2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaaya Khidmadaha waxay ku shubi doonaan lacagta koontooyinka dakhliga aan cashuuriga ahayn ee Dowladda uga furan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ama Koontooyinka kale ee ka furan Bankiyada kale oo ay Wasaaradda Maaliyadu cayinto.

## Qodobka 4aad
## Adeegsiinta Muwaadiniinta Saboolka ah

1. Si loo hubiyo in muwaadiniinta saboolka ah helaan Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka, kaas oo ka caawin doona sidii ay u heli lahaayeen adeegyada kale oo ay bixiso Dawladdu oo ay ku jirto kaalmada Dawladda, khidmadda Kaarka Aqoonsiga Muwaadinka ee lagu cayimay Qodobka 2-aad ee Xeer-nidaamiyahan waxaa looga dhaafay si waafaqsan Qodobka 5-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

2. Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka iyo Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda oo iskaashanaya ayaa muddo bil ah kusoo saaray Foomka Codsadaha Saboolka ah, kaas oo ka koobnaan doona aarimaha soo socda:

(b) Magaca iyo taleefon lambarka shakhsiga saboolka ah ee khidmada laga dhaafay;
(t) Xog-kooban ee ku saabsan adeegga loo qabtay;
(j) Xog-kooban oo muujinaysa sababta khidmada looga dhaafay;
(x) Cadadka lacagta khidmada ee laga dhaafay; iyo
(kh) Lambarka Aqoonsiga Qaranka ee lasiiyay.

3. Qofkasta ee sabool ah waxa laga buuxinaya Foomka Codsadaha Saboolka ah, waxaana ansixin doona Agaasimaha Guud ee Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka ama markuu maqan yahay, shakhsigii uu u igmaday, iyadoo nuqul ka mid ah foomka la ansixiyay loo geyn doono saraakiisha loo idmaday ee Wasaaradda Maaliyadda ee Hay'adda ka hawl-gala.

4. Saraakisha Wasaaraddu waxay si toddobaadle ah ugu gudbinaayaan foomamka loo keenay oo dhan Agaasimaha Guud ee Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda si uu u xisaabiyo qaddarka khidmadaha la dhaafay, isagoona Wasiirka Maaliyadda la wadaagi doona warbixin billa ah. Warbixinta khidmadaha laga dhaafay shakhsiyaadka saboolka ah waxay qayb ka noqon doontaa Warbixinta Canshuur-dhaafka ee rubuclaha ah ee loo gudbiyo Golayaasha Baarlamaanka.

**Qodobka 5ad**
**Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan**

1. Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaran waxa uu dhaqan-gelaya taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda iyo midda Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka.

**Xill. Cabdiqafaar Cilmi Xaange**
**Wasiir Ku-Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda**
**Ahna K/S Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WASAARADDA MAALIYADDA & LACAGTA
MINISTRY OF FINANCE & TREASURY
OFFICE OF THE DEPUTY MINISTER
XAFIISKA W. KUXIGENKA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA